

Jeermiska Hargabka nooca b

Waa maxay Hib (Jeermiska Hargabka B)?

Jeermiska Hargabka B (Hib) waa bakteeriyo keenta caabuq daran oo ku dhaca aadanaha si gaar ahna carruurta, laakiin sidoo kale shaqsyaadka nidaamkooda difaacu liito ama dadka aan lahayn beeryarada ama beeryaradooda uu cudurku waxyeeleeyay.

Sidee ayuu caabuqa Hib ugu dhacaa dadka?

Caabuqa Jeermiska Hargabka b waxaa sababta bakteeriyo aad u faafта. Waxay ku faafтаа hawada kadib marka qofku qufaco uuna hindhisо ama xataa markuu neefsado. Bakteeriyada ayaa ku noolaan karta sanka iyo dhuunta — ayadoo aan wax dhib ah qofka ku hayn. Mararka qaар bakteeriyada ayaa geli karta dhiiga kuna faafi karta maskaxda ama lafaha. Kan waxaa loo yaqaanaa caabuqa Hib ee jirka ku faafa.

Cudurka Hib wuxuu aad ugu badan yahay carruurta kayar 4 sano jir. Ilmaha ka yar hal sano jir ayaa khatar gaar ah ugu jira.

Waa maxay astaamaha caabuqa Hib?

Hib ayaa keeni kara xanuun daran uuna ku jiro

- Meningitis (dhaawac gaara xididada ku xeeran maskaxda)
- Septicaemia (sunta dhiiga)
- Epiglottitis (Cuno-bucuuc) (bararka dhuunta oo keenta in qofku ceegsamo)
- Osteomyelitis (caabuqa lafaha)

Yay tahay inuu qaato talaalka Hib?

Cudurka Hib ayaa looga hortagi karaa talaal.

Dhammaan carruurtu waa inay qaataan talaalka Hib marka ay jiraan 2, 4, 6 iyo 13 bilood.

Talaalka Hib ayaa la siiyaa carruurta ayadoo qayb ka ah [6 talaal oo ku wada jira 1 talaal](#) markay jiraan 2, 4 iyo 6 bilood jir. Talaalka 6 ku jirta 1 ka talaal ayaa ka hortaga gawracatada, Cagaarshoowga B, Hib, Jix-dheerta (Xiiqda) Dabaysha iyo Teetanada.

Kuurada xoojinta ah ee Hib ayaa la siiyaa ilmaha markuu gaaro 13 bilood isla marka uu qaadanaayo talaalka MenC. Tan ayaa siinaysa difaac dheeri ah oo ka dhan caabuqa Hib. Talaallada ayaa la siiyaa ayagoo lagu dhafay talaalka Hib/MenC.

Yay tahay inuusan qaadan talaalka Hib?

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka Hib. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka.

Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka Hib?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa baristamool ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiji inauusan aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood
Ilmaha talaalka buuxa qaba,

- 1 kamid ah 5 kii qof ayaa daremaaya xanuun, gaduudasho iyo barar ka fuulaaya meesha cirbada looga dhuftay.
- 1 kamid ah 50 qof ayaa yeesha qandho.

Ciladaha daran ayaa aad dhif u ah.

Sidee talaalka Hib u shaqeeyaa?

Talaalka Hib waxaa ku jira waxyaabo lagasoo qaatay bakteeriyyada *Jeermiska Hargabka nooca b.* Talaalka ayaa shaqeeyaa asagoo u sahla nidaamka difaaca jirku inuu cudurka ka falceliyo haddii qofka talaalka qaatay ay gaarto bakteeriyyada *Jeermiska Hargabka nooca b*, asagoo uusan qofku jiran.

Waa sidee saamaynta talaalka Hib?

Inta u dhexaysa 95% iyo 100% carruurta ayaa difaac abadiyan ah u yeesha Jeermiska Hargabka b (Hib) marka ay dhamaystaan jadwalka buuxa ee talaalka.

Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie